

# Siyaasadda JICA- Dharka Ardayga

Guddiga wuxuu aaminsan yahay in siyaasadda dharka ardayga ay tahay muuqaalka aasaasiga ah ee abuuridda jawi dugsiga badbaadsan, sahlaya waxbarasho aan lahayn arbushaadda aan loo baahnayn. Inta lagu guda jiro maalinta dugsiga, inta ay saaran yihiin gawaarida degmada dugsiga, iyo inta ay ku jiraan dhammaan waxqabadyada ama hawlaha la xiriira-dugsiga, ardayda waa in ay ku dhegnaadaan heerka dharka iyo muuqaal ee ku habboon.

Dharka adayga iyo muuqaalka shaqsi ahaaneed waa in ay gaarsiisnaadaan heerarka macquulka ah ee nadaafada iyo badbaadada waana in ay u muujiyaan xushmayn kuwa kale. Muuqaalka shaqsi ahaaneed iyo dharka ee jebiya heerarka macquulka ah, sharaf ridda, ceebeeya, ama dhibaateeya dadka kale ayadoo loo soo marsiinayo calaamo, erayo ama sawiro, iyo/ama si badan u arbushaadda nidaamka waxbarashada waa in aan loo dulqaadan.

Si loo aasaaso xeerarka degan ee cayiman, ee qeexa dharka habboon, dugsiga kasta oo kaashanaya Guddigiisa Dugsiga ee Wadashaqeeeya (CSC), waa in uu sameeyo kadibna daabaco heerarka ku habboon ee khuseeya dharka iyo fayodhawrka. Maamuleyaasha iyo dadka ay u magacaabeen waxay leeyihiin awoodda ugu dambeysa ee ay ku go'aaminayaan waxa uu yahay labbiska habboon ee loogu talagalay ardayda dugsiga ama ka qaybqaadanaya waxqabadyada la xiriira dugsiga.

Walxaha aan la aqbali karin

Walxahan soosocda waxaa loo arkaa in ay wax qasayaan lagamana aqbali kara dhulalka dugsiga, gawaarida degmada dugsiga, ama hawlaha iyo waxqabadyada dugsiga.

1. surweel dabagaab, canbuur, goonno ama dhar kastoo la mid ah ee ka gaaban dhererka dhexda bowdada
2. Ookiyaale, koofiyad ama marooyinka madaxa loogu xirto dhisme gudahiisa
3. Maro khafiif ah, maro jirka ku dhegan, maro dabacsan. ama dhar hoosta ka goosan oo aan habboonayn ee qaawinaya ama soo bandhigaya caloosha, dhabarkan, naasaha, bariyaha, ama xubnaha dhalmada, (Tusaale ahaan, walxahan soosocda waxaa lagu mamnuucay qaybtan: dharka laga sameeyay shabaqa kalluunka, shabaq, ama wax la mid ah, iyo dharka baneeya caloosha, maro qaar-kore gashi ah, dhar aan gadaal lahayn, korgashiga muujiya qaybta kor (tube tops). Korgashiga murqaha soo muujiya, korgashiga jirka muujiya ama dharka xilli qoraxeedka la gashto, iwm.)
4. Dhar kasta, walxaha shaqsigu, walxaha is-qurxinta, majoowharaadka, walxaha lagu midabeeyo timaha, waxyaabaha siyaadada ah, ama waxyaabaha jirka lagu qurxiyo ee ah ama ku jira erayo kasta, calaamado, ama sawiro:

- Loola jeedo daroogo, tubaako, aalkolo ama hub

- Oo ah dabiici galmo

- Oo ah fuxshi, u gefa diinta ama ilaahay, edeb-darro ah, kacsii-abuura ama sharci ahaan qadaf ah

- Sababo ah midabka, diyaargaraynta, calaamad ganacsi oo khaas ah ama sifooyin kale ee muujinaya xubinnimada baando, urur ama naadiyo taageeraya isticmaalka maandooriye, rabshad ama dabecad arbushaad

- Loogu hanjabayo badbaadada ama nolol-wanaagga qof kasta

- Dhiirigeliya waxqabad kasta ee lagu mamnuucay xeerka habdhaqanka ardayga

- U soo bandhigaya halis ama halis suurtagal ah badbaadada ama nolol-wanaagga qof kasta

-Haddii kale curyaamiya hawlgalka dugsiga ee dadka lagu gaarsiinayo adeegyada waxbarasho

5. Kabaha aan habboonayn, oo ay ka mid yihiin kabaha dusha ka banaan (saandal) ama dacaska qolka jiiifka

6. Dharka ciyaaraha fudud, sida dharka lagu ordo (marka laga reebo dharka ciyaaraha fudud ku habboon ee la xiranayo marka laga qaybqaadanayo fasalada ciyaaraha jirdhiska ama waxqabadyada kale ee ciyaaraha fudud)

7. Dharka hoosgashiga ah ee loo xirta sida dharka kore ahaan

8. Walxaha la isku qurxiyo ama fayodhwrka aan habboonayn

9. Dhar ama walxo kastoo la isku qurxiyo kale ee laga mamnuucay xeerka dharka ardayga ee loo adeegsan karo dugsiga gaarka ah.

Siyaasadda JK iyo JK-R (Anshaxa Ardayga) waa in ay xakamayso anshaxa ardayga ee ku xadgudbaya siyaasaddan.

Ka-reebitaan

Waxyaabaha ka reeban siyaasaddan waxaa sameyn kara maamuleyaasha dugsiyada ama dadka ay u magcaabeen si ay wax ugu qabtaan caafimaadka, diinta, ama baahiyada kale ee la midka ah ee arday gooni ah.

La Ansaxiyay 17 Maajo, 1965

La Muraajaceeyay 20 Agoosto, 1976

La Muraajaceeyay 21 Janaayo, 1999

La Muraajaceeyay 21 Juun, 2001

La Muraajaceeyay 15 Oktoobar, 2009

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JK, Habdhaqanka iyo Anshaxa Ardayga

Habraacyada GBEBA, Dharka Shaqaalaha, Waxyaabaha kale ee siyaadada ah, iyo Qurxinta ee loogu talagalay Shaqaalaha Shahaahada haysta (Macalimiinta), GBEBA-R, Dharka Shaqaalaha, Waxyaabaha kale ee siyaadada ah, iyo Qurxinta ee loogu talagalay Shaqaalaha Shahaahada haysta (Macalimiinta)